

Qaxootiga soomaaliyeed ee laanta socdaalka (Udlændingestyrelsen) ka helay warqad loogu sheegayo in la yaabo in sharcigooda dib looga celiyo (somali).

Laanta socdaalku waxay ka fiirsanaysaa in lagaala noqdo sharciga deganaanshaha waayo waxay u muuqataa in xaalada guud ee soomaliya isbedeshay taas oo ka dhigan in dadka soomaaliyeed dib ugu noqon karaan dalkooda hooyo.

Sidaas darteed waxay laanta socdaalku kaa codsanaysaa in aad xerada Sandholm u timaadid waraysi arintaas ku saabsan. Inaad timaadid waraysiga laguugu yeeray waxay muhiim u tahay dacwadaada. Adiga ayaa iska bixinaya kharashka tareenka ama baska marka aad imaanaysid xerada Sandholm.

U diyaar garow waraysiga

- Waa inaad buuxisaa oo saxiixdaa foom ku saabsan macluumaadkaaga shakhsiga ah. Foomka wuxuu la socdaa warqad ay kuu soo dirtay laanta socdaalku. Horay u soo qaado foomka oo aad soo buuxisay maalinta waraysiga.
- Waxaa in aad soo qaatadaa wax walba oo dokumeenti ah oo ku saabsan shaqadaada, waxbarashada iyo xaaladaada caafimaad (warqadda dhaqtarka). Sidoo kale waa in aad soo qaadataa baasaboorkaaga.

Waraysiga

- Si faah-faahsan uga waran waxa aad ka cabsanaysid ama kugu dhici kara iyo sababta aad uga cabsanaysid haddii aad dib ugu laabatid soomaliya.
- Ka sheeke dhibaatooyinkii markii hore aad uga soo qaxday dalkaagii iyo in wax saamayn ku yeelan kara xaalkaaga ama xaalka qoyskaagu is bedeleen tan iyo markii aad ka soo baxday dalkaagii hooyo.
- Waa inaad xoogga saartaa waxyaalah sida gaarka adiga iyo qoyskaaga idiin quseeya.
- Sheeg haddii ay jiraan khatar gaar ah oo qoyskaaga ku dhici karta haddii ay ku laabstaan soomaliya. Tusaale ahaan haddii aad leedahay gabdho yar yar oo aad ka cabsanaysid in la guddo haddii aad soomaliya ku laabataan.
- Waxaa wax lagaa waydiin doonaa caafimaadkaaga, xiriirka aad la leedahay Denmark iyo xiriirka aad la leedahay Soomaaliya.

Haddii Laanta Socdaalka kaala noqoto sharciga (si joogto ah u eeg E-BOKS-kaaga)

Haddii laanta socdaalku kaala noqoto sharciga deganaanshaha waxay go'aanka kuugu soo dirayaan e-boks. Sidaas darteed waxaa muhiim ah inaad si joogto ah u eegtid e-boks-gaaga. Haddii sharciga lagaala noqdo waa inaad adigu go'aankaas uga dacwootaa maxkamadda qaxootiga ee loo yaqaan **Flygtningenævnet** (fln@fln.dk). Maxkamaddu waxay kuu qabanaysaa looyar ama qareen bilaash ah. Sidoo kale haddii qoyskaaga halkan lagu keenay nidaamka isku-keenista qoyska (familiesammenføring) waa in ay laftoodu u dacwoodaan maxkamadda ajaanibta ee loo yaqaan **Udlændingenævnet** (udln@udln.dk). Waa muhiim inaad go'aanka ka dacwootid isla markaba, si aad si sharci ah ugu sii joogtid Denmark inta dacwadaadu socoto. Haddii aadan doonayn inaad ka dacwootid go'aanka laanta socdaalka waa inaad dalka uga baxdaa muddo 30 ¹/₂ shishe gudahood ah.

Waxaad dalban kartaa caawinaad haddii aad dalkaagii dib ugu laabanaysid

Haddii aad aqbashid go'aanka laanta socdaalku kaagala noqotay deganaanshaha, aadna doonaysid in aad dalkaagii u safartid, waxaad dalban kartaa caawinaad dhaqaale ugu badnaan 30 cisho ka dib markii aad heshay go'aanka laanta socdaalka ee sharciga lagaagala noqday.

Haddii aad dacwad ka furtid go'aanka laanta socdaalka, waxaad dalban kartaa caawinaada dhaqaale marka maxkammadda qaxootigu ku siiyo diidmada kama dambaysta ah haddii aad si sharci ah dalka ku joogtay intii dacwadaadu socotay. Hadaba si aadan u lumin xaqqa aad u leedahay in lagu siiyo caawinaad dhaqaale **waa in go'aanka laanta socdaalka kaga dacwootaa muddo 7 cisho gudaheed ah.**

Caawinaada dhaqaale ee la siiyo qofka dalkiisa ku noqonaya waxay isugu jirtaa: lacag caddaan ah oo badan, kharashka safarka, caymis caafimaad iyo weliba dawada muddo hal sano ah, talaal iyo dhammaan wixii kale ee lagama maarmaarn ah.

Wixii faah-faahin dheeraad ah kala xiriir hay'adda Dansk Flygtningehjælp gaar ahaan qeybta qaabilsan magan-gelyada iyo dib-u-noqoshada.

Waxaad nagala soo xiriirtaa telefonka 33 73 50 00 maalmaha isniinta iyo jimcaha haddii aad ku hadli kartid **daanish** ama **ingiriisi**.

Maalin kasta oo khamiis waxaad soo wici kartaa telefonka 33 73 52 18 saacadda: 10 subaxnimo ilaa 12 duhurnimo waxaadna ku hadli kartaa **af-soomaali**.